



## **Ballaarinta Barnaamijka Tababarka Saraakiisha Yaryar ee Keydka ah (JROTC) ee Iskuulka Sare ee Highland Park**

Barnaamijka JROTC waxaa jecel ardayda iyo qoysaska, waxaana hadda laga bixiyaa iskuullada kala ah Como Park (Marines), Harding (Navy), Humboldt (Army), Johnson (Air Force) iyo Washington (Navy). Barnaamijku wuxuu ardayda baraa hoggaanka iyo waxbarasho tayo leh iyo in loo adeego waddanka iyo bulshada. Barnaamijka waxaa ka faa'iidaysta kana qeybgala bulsho ku kala duwan: jinsiga, jinsiyada, dhaqaalaha iyo waliba kuwo naafa ah iyo kuwo aan ahayn. SPPS waxay leedahay taariikh 21 sano ah oo ku salaysan barnaamijyo ku dayasho mudan, waxaana arrintan ka wara qaba kormeerayaasha gobollada.

### **Miisaaniyadda**

**Si buuxda ayaa barnaamijka loo maal galiyey marka laga raabo gunnada.** Sanadka 2017, SPPS kharashka ay ku bixinayso barnaamijka waa \$567,500 wasaarada difaacana waxay bixinaysaa \$432,500. Sida badan, kooxaha waxaa ka mid ah hal askari oo hawl-gab ah iyo askari ka diwaangashan milatariga. Isku-cel-celis barnaamijku wuxuu ku kacaa kharash dhan \$200,000; kala badhna waxaa bixisa wasaarada difaaca. Ciidamada cirku waxay bixiyaan kharashaadka hawlaha waxaana ka mid ah:

- Dharka yunifoomka iyo agabka manhajka
- Cunnooyinka marka la aadayo safarada gaagaaban
- Qalabka fasallada iyo xafiisyada iyo waliba qalabka IT-ga
- Kala badh mushaarka macallinka iyadoo lagu saleynayo darajada uu kaga jiro milatariga

### **Manhajka**

- Manhajku 60% waa maaddooyin ku saabsan taariikhda duulitaanka cirka iyo saamaynta ay bulshada ku yeelato; saadaasha hawada, jahada iyo tilmaamaha, iyo waliba siinta fursado shaqo.
- Manhajka 40% waxaa ka mid ah cilmiga diyaaradaha, barashada hoggaanka iyo tababar dhinaca jirka ah.
- Sanad walba dib-u-eegid ayaa lagu sameeyaa manhajka, shantii sano hal mar ayaa mid cusub la qoraa
- Sida caadiga ah, fasalladu waxay u baxaan 2 maalmood oo ah AS, 2 maalmood oo ah LE iyo 1 maalin oo ah jir dhiska
- Barnaamijka JROTC wuu ka duwanyahay barnaamijka IB
- Fasallada doorshada ah ee barnaamijka JROTC maalin walba isku xilli ma bixi doonaan



- Fasallada doorshada ah ee barnaamijka JROTC waxaa laga yaabaa inay isku dhacaan ama aysan isku dhicin wakhtiga ay fasallada caadiga ah baxaan
- Qorshaynta iyo jadwalka fasallada waxaa go'aansan doona maamluleyaasha iskuullada
- Koorsooyinka JROTC waxaa lagu xisaabayaa koorsooyinka doorashada ah oo kaliya
- Barnaamijka JROTC qeybihiisa kala duwan dhammaan (Army, Marines, Navy, Air Force) waxay bixiyaan fasallo isku mid ah

## Aragtida, Yoolka, Ujeeddada AFJROTC

Horumarinta waddaninyiin u taagan adeegga waddankooda iyo bulshadooda

### Yoolka

- Samaynta qiimo waddaninimo, u adeegga Dawladda Mareykanka, masuuliyadda shakhsi ahaaneed, iyo dareenka guusha

### Ujeeddada

- Baridda iyo tababarka ardayda ee waddaninimo iyo xirfadaha nololsha
- Horumarinta adeegyada bulshada
- Dhiirri galinta masuuliyadda
- Horumarinta hab-dhaqanka iyadoo ardaydu ka baran doonaan akhlaaq wanaagsan cashirrada iyo qiyamka asaasiga ah ciidamada cirka ee ah "Sharafta ayaa kow ah, adeegga bulshada ayaa ka horeeya kan gaarka ah, wanaajinta wax kasta oon samayno."
- Barnaamijka ma ahan shaqaalaya milatari oo cad, qasabna ma ahan inaad noqoto milatari
- Haddii ardaygu go'aansado inuu ku biiro milatariga, wuxuu helayaa lacagta diiwaangalinta ee mlatariga
- Haddii ardaygu ka mid ahaado barnaamijka JROTC 2/3 sano, wuxuu helayaa faa'iidooyinka kuleejka

## Shuruudaha Goobta/Qolka

- Qol ammaan ah oo ka duwan fasallada caadiga ah
- La kontorooli karo hawadiisa, ugu yaraan ah 400' sq, islamarkaana leh meel ay ardaydu dhigan karaan dharka yunifoomka ah
- Si wadajir ah aan loo isticmaali karin, galitaankiisu ku xaddidanyahay oo kaliya shaqaalaha iyo ardayda AFJROTC

## Saamaynta – Faa'iidada\*<sup>1</sup>

- Waxaa xoogga la saarayaa waddaninimada
- Ka qeybgalka adeegga bulshada ee iskuulka iyo bulshada dhexdeeda ah
- Sahanka ardayda ee xirfadaha shaqo, gaar ahaan kuwa la xiriira cilmiga sayniska

---

\* Ogow: Haddii saamayntu ay tahay faa'iido ama walaac, waxay ku xirantahay qofka aragtidiisa.



- Ardayda waxaa laga filayaa inay muujiyaan heer sare oo dhinaca waxbarashada, hab-dhaqanka iyo imaatinka iskuulka
- Fursad wanaagsan oo hoggaamiyenimo oo loo sameeyo ardayda waaweyn
- Koorsooyin dheeraad ah oo ay ardaydu kala dooran karaan
- Fursadaha ka dambeeya iskuulka sare oo loo diyaariyo
- Fursadaha hoggaaminta bulshada oo loo diyaariyo
- Doorasho xooggan oo ardaydoo dhan loo diyaariyo
- Waxaa jecel in badan oo ah ardaya SPPS iyo waalidintooda oo hadda ka qeybgala iskuullada bixiya barnaamijka JROTC
- La samaynta xiriir shanta tiir ee u-diyaar garowga xirfadaha shaqo iyo kulliyadaha
- Ujeeddada barnaamijka IB kama hor-imaanayso barnaamijka JROTC; inkastoo loo qaabeeyay sidii barnaamij caalami ah, barnaamijka IB waa mid u oggolaanaya iskuullada waddamada oo dhan ku yaalla inay ku faanaan waddanimadooda.
- Ardayda ayaa awood u leh inay doortaan qiyaasta ay doonayaan inay ka qeybgalaan barnaamijka JROTC ee iskuulka ka-dib ama iskuulka ka-hor
- Marka iskuul lagu kordhiyo barnaamijka JROTC, macneheedu ma ahan in koorsooyinkii caadiga ahaa la dhimayo ama la jarayo
- Koorsooyinka barnaamijka JROTC waxaa lagu darayaa dhibcaha ardayga ee guud (GPA)
- Tirada fasalka ee ardayda ka qeybgalaysa barnaamijka JROTC waxaa go'aamiya maamuleyaasha iskuulka

### **Saamaynta – Cilladaha/Walaaca\* 2**

- Hoos u dhaca missaaniyadeed ee SPPS waxaa laga yaabaa inuu oggolaan waayo in barnaamijka loo helo dakhli/dhaqaale
- Aragtida waalidiinta iyo bulshada oo ku kala fikir duwan in hawlo milatari la keeno iskuullada sare ee ilmuhu wax ku bartaan
- Haddii la diiwaan galiyo xilli dagaal socdo, saamaynta dhaqaale, shaqo, iyo tan maskaxeed ee ay arrintani ku yeelan karto ardayda qalin jabisay ee iska diwaan galisay ciidamada
- Saamaynta ay ku yeelan karto ardayda soo arkay dagaallo islamarkaana u arka in milatarigu yahay dhibaato
- Si cad in loogu qalqaaliyo ardayda inay ka qaybgalaan ciidanka
- Qoritaanka ciidamada oo bartimaameedsada ardayda aan caddaanka ahayn
- Wax yeello ku iman karta shahaadada barnaamijka IB-ga maadaamo ardaydu ay ka qeybgalayaan JROTC, arrintan oo laga yaabo in ardayda ay ku qasabto inay kala doortaan shahaadada IB-ga ama barnaamijka JROTC

---

\* Ogow: Haddii saamayntu ay tahay faa'iido ama walaac, waxay ku xirantahay qofka aragtidiisa.



- Ka baaraan-degidda in la diwaan galiyo ardayda qabta PTSD oo markay arkaan ardayda xiran yunifoomba uu ku soo koco xanuunku, SPPS waxay leedahay xarunta Trauma Sensitive Schools oo ka hor tagta islamarkaana caawisa ardayda qabta PTSD.

## Lifaaqa I – Xogta Ka-qeybgalka Ardayda fasalka labo-iyto-tobnaad

### Xogta Ra’yi-urrurin ku saabsan Qorshaha ka Dambeeya Dugsiga Sare

(2016 qorshaha ardayda dugsiga sare oo dhan iyo 2016 ka diwaangashan barnaamijka JROTC)

Goobta	Galo Jaamacad 4 sano ah	Galo Kuleej 2 sano ah	Wadarta Kuleejyada ah 2 & 4 sano	Galo Jaamacad Dibadda	Dhamaystirto Barnaamijka Tababarka	Wali go'aan ma qaadan	Ku biiro Milatariga	Wax kale	Shaqo Buuxda Galo
AGAPE	61%	15%	76%	0%	2%	5%	0%	2%	15%
Central	14%	74%	89%	1%	0%	3%	1%	4%	2%
Como Park	36%	47%	83%	1%	1%	3%	3%	7%	3%
Creative Arts	21%	39%	61%	0%	0%	9%	0%	12%	18%
Gateway	42%	42%	83%	0%	0%	8%	0%	8%	0%
Gordon Parks	52%	11%	64%	0%	2%	11%	0%	0%	23%
Harding	33%	38%	71%	0%	0%	9%	2%	9%	9%
Highland Park	19%	68%	87%	2%	0%	3%	2%	3%	4%
Humboldt	33%	38%	71%	0%	0%	9%	2%	9%	9%
Johnson	35%	50%	85%	1%	0%	4%	4%	3%	4%
LEAP	51%	5%	56%	0%	0%	5%	0%	5%	35%
OWL	46%	32%	79%	0%	0%	4%	11%	7%	0%
Washington	38%	49%	87%	0%	0%	3%	4%	2%	4%
<b>WADARTA</b>	<b>30%</b>	<b>53%</b>	<b>83%</b>	<b>1%</b>	<b>1%</b>	<b>4%</b>	<b>2%</b>	<b>4%</b>	<b>5%</b>

Goobta	Qeybta	Tirada # Ardayda fasalka 12'aad	Jaamacad 4 sano ah	Barnaamij 2 sano ah	Iska diiwaangalinta Milatariga (Ay ka mid tahay. Ilaalada Qaranka)	Wali go'aan ma qaadan	Xirfad shaqo/Shahaado
Washington	Navy	29	13	5	7	0	4
Harding	Navy	23	7	9	6	0	1
Humboldt	Army	38	24	6	6	0	2
Como	Marines	9	3	3	1	0	2
Johnson	Air Force	15	4	5	3	1	2
<b>WADARTA</b>		<b>114</b>	<b>51</b>	<b>28</b>	<b>23</b>	<b>1</b>	<b>11</b>



## Lifaaqa II – Ka-qeybgalka JROTC oo ku Salaysan Qowmiyadda

**Tirada Ardayda ee Qeyb Walba iyadoo lagu Salaynayo Qowmiyadda - SY2016-17 (1st Quarter)**

	Como Park Senior High		Harding Senior High		Humboldt Secondary School		Johnson Senior High		Washington Tech		Tirada guud ee ardayda iskuullada ee qeybaha barnaamij ka oo dhan	
	Tirada ardayda dhigata barnaamijka Marines JROTC	Tirada guud ee ardayda.	Tirada ardayda dhigata barnaamijka Navy JROTC	Tirada guud ee ardayda.	Tirada ardayda dhigata barnaamijka Army JROTC	Tirada guud ee ardayda.	Tirada ardayda dhigata barnaamijka Air Force JROTC	Tirada guud ee ardayda.	Tirada ardayda dhigata barnaamijka Navy JROTC	Tirada guud ee ardayda.		Tirada guud ee ardayda dhigata barnaamijka JROTC
American Indian	0	12	0	42	1	16	2	25	3	22	6	117
Asian	54	384	96	1062	92	521	45	719	95	1210	382	3896
Hispanic	10	88	25	211	24	233	36	139	20	248	115	919
Black	23	612	25	444	31	411	21	321	9	542	109	2330
White	22	669	14	126	6	62	22	136	8	92	72	1085
Multiracial	1	0	0	0	0	0	4	0	0	0	5	0
Wadarta	110	1765	160	1885	154	1243	130	1340	135	2114	689	8347



